Ett Narkotikafritt Sverige

Somaliska

AYAA GACAN SARRAYNAYNAYA?

Iswidhan oo laga waayo maandooriyaha

ENS2000

Iswidhan oo laga waayo maandooriyaha sannadka 2000 ayaa waxa la bilaabay sannadkii 1989kii maantana ololaha ugu weyn ee Iswidhan waxa weeyi oo uu khuseeyaa in warbixin bilaash ah loo helo dhammaan ardayada dhigata heerka dhexe ee dugsiga aasaasiga ah, heerka sare ee dugsiga aasaasiga ah iyo dugsiga sare.

Waxaannu sannadkan gudihiisa dirnay jaraa'id, xayeysiisyo ama ii dheh, filimaan, tartammo habaysan, waxa kale oo la qaybiyey deeq waxbarashooyin, waxa kale oo wax la baray in ka badan 6500 oo qof oo ka kala socdey 1500 oo dugsi. Waxa kale oo weliba aannu dhammaan dugsiyada u dirnay siyaasad ku saabsan maandooriyaha iyo fayl ay ku qoran tahay ka hortagga daroogada, qoraaladdaas dugsiyada loo dirayo oo bilaash lagu cusbooneysooyo afar jeer sannadkliiba.

Waxaannu si adag ugu shaqaynay sidii aannu dugsiyada ugu soo heli lahayn warbixinta ugu badan, shuruuduna waxa weeyi sidii dugsiyadu bilaash ugu heli lahaayeen dhammaan wixii qalab ah isla markaana leh tayo fiican. Waxay annaga nala tahay in shaqadaasi ay tahay mid si aad ah muhiim ugu ah maadaama si xun u isticmaalka maandooriyuhu ay si aad ah ugu sii kordhayso waddanka, iyada oo nasiib darro weliba si aad ah loo isticmaalay sannaddadii ugu dambeeyey. Waxa nasiib wanaag ah in aannu haysano maalgeliyayaal fara badan oo ka socda hey'ado ka socda wershedaha iyo ganacsiga iswidhishka, ayaa waxaannu dugsiyada ku marti qaadi karnaa qalab ama buugaag lagu isticmaali karo dugsiga koowaad ku waas oo si buuxda uga warramaya dhammaan wixii warbixin ah ee ku saabsan maandooriyaha iyo qalabka kale ee kordhiya firfircoonida jidhka.

Haddii aad dooneyso in aad ogaato warbixin dheeraad ah, waxaad gashaa bogga Internetka ee cinwaankiisu yahay www.ens2000.se!

ENS 2000
Ett Narkotikafritt Sverige

Magaca **(Cannabis)** waxa weeyi magac guud oo kulmiya xashiishadda, marijuana iyo xashiishadda saliidda ah. Xashiishaddu waa maandooriyaha caadiga ah ee lagu isticmaalo waddanka Iswidhan. Dad badan ayaa u arka in xashiishaddu ay tahay maandooriye fudud oo aan khatar u ahayn sida maandooriyayaasha kakle ee ”culus”

Arrintaasi waxba kama jiraan. Ma jirto maandooriye fudud ama culusi. Maandooriyuhu waa maandooriye. Hadalkii oo kooban.

Dhallinyarada xashiishadda cabta:

- waxa istaagi kara koritaankooda
- waxa ku dhici karta in xusuustoodu ay gaabato
- waxa ku dhici karta in fikiradda ama habka ay u fikriaan ay xumaato
- waxay noqon karaan kuwa caajisan oo aan firfircoonayn oo dareenkoodu hooseeyo
- waxa ku dhici kara in xashiishaddu baddesho ruuxda qofka iyo noloshiisaba
- waxa dhici karta in qofku isku dhex daato
- waxa ku dhici kara in ay hoos u dhacdo samaysanka shahwaddoodu
- waxa ka lumi kara hammadda galmoodka
- waxa ku dhici kara in khalkhal uu dhaco wakhtiga dhiigga ee caadada
- waxa xumaan kara habka daafaca cudurrada ee jidhkooda

Miidda ama dareeraha madow ee maaddedda cannabis waxay ugu yaraan ka kooban tahay 50 % in ka badan inta ku jirta buuriga caadiga ah, waxana ku jirta khatar sare oo ay ka mid tahay kansarka sombobadu.

Maaddedda cannabis maaha sidiisaba maandooriye fudud.Cannabis iyo xashiishadduba waxa weeyi maandooriye.

Herowiintu (Heroin) waxay ka mid tahay kooxda loo yaqaaan opiater waxayna yaraysaa oo ay hoos u dhigtaa habka dareemayaasha, gaar ahaan goobta xanuunka. Herowiinta waa laysku turqaa ama waa la ursadaa ama sida siggaarka ayaa loo cabbaa. Dhallinyaro fara badan ayaa cabbitaanka maandooriyaha herowiinta barbardhiga xashiishadda ama marijuana. Khatarta ku jirta herowiintu waa mid sarraysa oo labanlaab ah. Maandooriyaha herowiin iyo mukhaadaraadka kaleba waa maaddooyin haddii la barto la qabatimo waana ka ugu adag in hadhow layska daayo.

Dhaawaacyada:

- shaqada midhiqirrada iyo kalyaha oo xumaata
- hammada galmoodka oo lunta
- afka oo qallala ama engega
- yalaalugo

ENS 2000

Ett Narkotikafritt Sverige

Sikhraddu waxay keentaa deggenaan iyo xanuunka oo aan la dareemin dabadeed qofku wuxu galaa xaalad sukhuur ah oo hurdeysan oo waxa hoos u dhaca shaqada maskaxda iyo dareenka, waxana laga yaabaa in jidhku uu kululaado oo uu cuslaado. Qofku wuu dhimanayaa haddii uu qaato qiyaas aad u fara badan maadaama shaqada maskaxda ama neefsashadu ay is taagi karto mar aan la filayn. Khatarta dhimashadu waa mid sarraysa, Qiyaastii shan jeer ayey khatartu ka sarraysaa marka loo eego da'da caadiga ah, 1-2 irbadood oo laysku turqo ayaa ku filan in qofka noloshiisu ay ku xidhnaato oo ay qabatinto maandooriyaha.

Dad fara badan ayaa ku dhinta maandooriyaha herowiinnta marka la barbardhigo dhammaan maandooriyayaasha kale ee sharci darrada ah marka laysku daro. 100 kii qof ee isticmaala maandooriyaha herowiinta waxa ka badbaada marka laysku celceliyo 4 qof.

Amfetamiin (Amfetamin) ka waxa loo tiriyaa "maandooriyaha farxadda keena" maaddaama ay kor u qaaddo xaaladda dareenka. Maandooriyaha Amfetamiin waxyaabaha ay wax ka baddesho ee ay raad ku yeelato waxa ka mid ah maskaxda, sombobada iyo wadnaha.

Dhaawaacyada:

- Waxa kor u kaxa shaqada wadnaha iyo habka neefsiga
- cadaadiska dhiigga oo kor u kaca
- afka oo qallala
- madax xanuun
- dhidid iyo xummad
- garriirid ama qadhqadhid
- fiitamiin yaraan, nafaqo darro
- khalkhal xagga aragga ah
- dawakhaad
- khalkhal xagga huradada ah
- ilkaha oo hore u daata
- shiki ama cuqdad nafsi (paranoia)

Cudurka cilmi nafsaniga:

- rabshad
- werwer
- khayaali
- aragti ama maqal dhalanteed ah
- cadawtinimo

ENS 2000
Ett Narkotikafritt Sverige

Kolka qofku sska daayo mukhaadaraadka:

- murugeysnaan
- nafsad la'aan, abitaayt la'aan
- gaajo
- xanuun xubnaha ah
- werwer

Maan dooriye xaad dhaaf ah oo la qaato:

- muruqyada qofka oo isku soo koga
- neef qabatow
- jidhka oo si xad dhaaf ah u kululaada
- wadnaha oo istaaga

Istcmaalka maaddooyinka kordhiya awoodda wax qabadka (Dopning)

Hablaha waxa ku dhaca bukitaan khatar oo ka dhasha cuntada oo la cuni waayo (anorxia), wiilashana waxa ku dhaca waxa loo yaqaan (magarexia). Habluhu way is macaluuliyaan si ay u dhuubnaadaan oo ay u quruxbadnaadaan, wiilashuna waxay cunaan dawada lagu naaxo si ay u buurnaadaan oo muruqyaduna xoog u yeeshaan. Isticmaalka daweda isbuurnaynta khsaareheeda ayaa ka badan faa'iidadeeda.

Dhaawaacyada:

- maaddeda anabola steroider waxay kordhisaa xanaaqa iyo rabshoolanimada
- dhammaan dadka qaata maaddeda anabola wadnohooda waxa ku dhaca isbeddel
- waxay keeni karta jidhka oo uu buurbuur ka soo baxo iyo beerka oo yaraada
- khatar ah caabaq ama xanuun ku yimaadda qanjidhka ragga ee soo saaraha dareeraha shawedda qaada
- qofka oo ay ku adkaato in uu kaatsho
- qofka oo koritaankiisu uu istaago
- fin doob ka soo baxa wejiga iyo jidhka
- timaha oo daata
- wadne xanuun
- halbowlayaasha dhiigga oo xidhma
- shaqada kalyaha oo xumaata
- hammeda galmoodka oo si xoog ah kor ugu kacda marka hore, dabadeedna marka dambe si buuxda hoos ugu dhacda
- dhikilaha oo yaraada
- samaysanka shahwedda oo yaraata ama gebi ahaanba istaagta

ENS 2000
Ett Narkotikafritt Sverige

- ragga dhallinyarada ahi waxay khatar ugu jiraan in ay ma dhaleys noqdaan
- muruqyada oo isku soo koga
- muruqyada oo shaqayn waaya dhaawac ku dhacay

Haweenka:

Marka laga yimaaddo waxyeelloyinkaas xagga sare lagu soo sharraxay maaddedda loo yaqaan anabola steroider waxay haweenka u yeeshaa codka ragga, gadh ka soo baxa iyo khalkhal ku dhaca xilliga dhiigga caadadu uu yimaaddo.

(Kokain)

Maandooriyaha loo yaqaanno kookayntu (kokain) waxay la bah tahay maandooriyaha kale ee loo yaqaan amfetamin, farqiqa u dhaxeeyaa waxa weeyi in maandooriyaha kookayntu ay tahay maadded si xoog leh wax u suuxisa.

Kookaynta waxa loo qaadan karaa iyada oo sanka laga nuugo oo laga ursado ama laysku mudo ama si toos ah canka loo dhigo ama waxa layska geliyaa walamadka dabada ama siilka dumarka.

Dhaawaacyada:

- sanka oo duuf ka yaaco, sanka oo dhiiga
- carjawda sanka ee dulalka oo wax noqota taas oo keenta in dalool uu ka samaysmo meesha kala qaybisa sanka.
- suuxid
- suuxid ama qallal
- caatoobid
- tamardarnaan
- gariirid ama qadh-qadhid
- yalaalugo
- matagid
- wadnaha oo si xoog ah u shaqeeya
- hiinfaadhid ama neefqaadasho degdeg ah
- xummad
- dhididid
- calool taag
- hammo darro (kacsi darro)
- khayaal ama dhalnteed
- hurda la'aan

Maan dooriye xaad dhaaf ah oo la qaato:

- qallal ama dabayl

ENS 2000
Ett Narkotikafritt Sverige

- xummad fara badan
- dhimasho la xidhiidha wadnaha oo istaaga ama miyir la,aan lama filaan ah oo degdeg ah

LSD (LSD) waxa weeyi maandooriye khayaali ama dhalanteed abuura, kaas oo weliba haddii la qaato laba firi oo leeg milixda) wuxu baddelayaa dareenka ama xiska qofka. Mukhaadaraadkani wuxu aad caan ugu noqday magaca flower power-eran. Sikhradda maandooriyaha LSD waxay ku timaaddaa qiyaastii 15-60 miridh ka dib marka la qaato waxayna sikhraddaasi qofka kujirtaa qiyaastii muddo 4 saacadood ah. Marka qofku uu istcmaalo maandooriyaha LSD kolkaa qofku ma kantarooli karo falalka uu samaynayo. Qofku marka uu mukhaadaraadka isticmaalo wuxu u malaynayaa oo ka dhaadhacsan in suurta gal ay tahay in uu joojin karo oo uu qaban karo tereenka, in uu ka soo duulikaro saqafka sare ee guryaha iwm. Mnaadooriyaha LSD wuxu keeni karaa cudurro khatar ah oo xagga nafsaaniga ah, tusaale ahaan qofka oo maskax ahaan isku dhex daata (schizofreni).

Maan dooriye xaad dhaaf ah oo la qaato:

- raad ama socod dheer oo xooggan
- dabeecad ama akhlaaq nooc kale ah

GHB (GHB) Dawada loo yaqaan GHB (Gammahydroxybyurat) waa dawo loo isticmaalo suuxinta. Waxa la helaa iyada oo sida budada ah ama iyada oo ah sida dareeraha ah. Urteedu waxay ku xusuusinaysaa oo aad u malaynaysaa sidii marada istiraashada ee dhulka lagu masaxo oo kale.

Waxyeellooyinkeeda:

- daal badan oo aan dabiici ahayn
- matag
- gariirid (qadh-qadhid) iyo qallal
- Dawadaas GHB nolosha ayey khatar gelineysaa haddii qiyaas xad dhaaf ah la qaato isla markaana lala isticmaalo khamri iyo maandooriyayaal kale.

GHB waxa loo aqoonsaday oo lagu daray dawooyinka, kadibna 1dii bishii feebarweri ee sanndkii 2000 ayaa loo aqoonsaday oo lagu daray maandooriyayaasha. Taas micnaheeduna waxa weeyi in dhammaan wixii GHB meherad ah ee aan dawo ahayn laysku ciqaabo.

Waddanka maraykanka waa laga mamnuucay dawada GHB isla sannadkii 1990kii ka dib markii la ogaaday in maandooriyuhu uu sobob u noqday dhowr dhimasho iyo xaalado cudur oo khatar ah.

Dawada GHB waxay sobobtaa in qofku caadayesto oo uu qabatimo waxayna keentaa dulqaad darro iyo dhibaato ah in qofku aanu iska deyn karin (taas oo ah in si tallaabo tallaabo ah loo kordhiyo qiyaasta dawada si waxtarkii loo baahnaa loo gaadho).

ENS 2000

Ett Narkotikafritt Sverige

Ecstasy (Ecstasy)

Maandooriyaha loo yaqaan ecstasy waa sunta dareemayaasha waxayna keeni kartaa dhaawacyo ba'an oo ah xagga cilmi nafsiga. Maandooriyhu wuxu ka soo caan baxay wddanka Igland 80 siddeetameeyadii. Maandooriyaha Ecstasy waa mid qiimaheedu jaban yahay aadna way u dhibyartahay in la soo saaro oo la sameeyaa. Waxaa loo qaataa sida kiniinka waxayna leedahay magacyo kala duwen sida: Adam, XTC ama maandooriyaha (yuppiedrogen). Qofku marka uu cuno maandooriyahaas wuxu noqonayaa mid firfircoon waxaanu dhaansi karaa oo uu ciyaari karaa intii la doonaba.

Maan dooriye xaad dhaaf ah oo la qaato:

- qallal ama dabayl
- heerkul aad u sarreeya
- dhiig xinjirow
- cillad kalyaha ah
- xummad fara badan
- miyir beel ama koomo
- dhimasho

Dawo (Läkemedel) Tusaale ahaan. Rohypnol, valium, sobril

dawooyinka dadka dejiyaa badanaa waa dawooyin xoog leh oo soboba in dadku ay had iyo jeer bartaan oo aanay ka maarmi karin ee ay ku xidhnaadaan. Dawooyinku waxyaabaha ay sameeyaan waxa ka mid ah in muddeda falgalku uu xumaado, qofku wuxu noqdaa mid caajis ah oo tamar iyo damac aan lahayn.

Qaar ka mid ah dawooyinkii 60 lixdameeyadii ayaa waxa lagu daray oo la raaciyey maandooriyayaasha.
Isku daridda khamriga, kiniinadda iyo maandooriyahu waxa weeyi hab ay ku dheeraystaan muddeda sikhradda isla markaana ay kor ugu qaadaan awoodda sikhradda dhallinyarada iyo khamriyacabka googo'ay labadooduba. Shilal badan oo dhimasho ah ayaa dhacay maaddaama maxsuulka ka soo baxaya aan la saadaalin karin wuxuu noqonayo.
Sannadadii ugu dambeeyey waxyaabaha aad looga hadlay waxa ka mid ah Rohypnol. Maaddedaasi waxay caan ku noqotay oo isticmaala kooxaha dambiilayaasha ah, waayo si aanay jixinjixo uga gelin dadka kale. Qofku waxba uma aaba yeelayo marka uu samaynayo falalka dembiyada ah iyo kuwa uu xoog wax ku muquuninayo.
Dawada Rohypnol xitaa waxa loogu yeedhaa maandooriyaha "date-rape-drug" waxa loo adeegsadaa si loo suuxiyo qofka lagu fikirayo in la kufsado.
Dhowr ka mid ah shirkadaha soo saara Rohypnol ayaa immika ku daray kiniinka maaddooyin midab ah oo dareeraha ku milma oo xanniba tusaale ahaan in kiniinkaas lagu rido khamri.

Sanka oo laga nuugo mukhaadaraadka (Sniffning)

Sanka oo mukhaadaraadka laga nuugaa waxay noqotay mid immika la isticmaalo oo dib u soo noqotay. Waxyaabaha badanaa la isticmaalaa waxa weeyi thinner, solution, xabagta iyo gaaska la shito (waa maaddooyinka loo yaqaan butan ama propan). Sikhraddu si degdeg ah ayey u timaaddaa isla markaana waxay keentaa dareenno aan dhab ahayn iyo khayaali ama dhalanteed. Dhammaan mukhaadaraadka sanka laga nuugo waxay dhaawacyo ku keentaa xarunta dhexe ee dareemayaasha jidhka iyo maskaxda. Welibana beerka iyo kelyuhuna si ba'an ayey u dhaawacmaan. Haddii qofku uu miyir beelo waxa loo baahan yahay daaweyn dhakhtareed oo degdeg ah waxaana muhiim ah in in laga warramo oo la sheego in qofku isticmaalay maandooriyaha sanka laga nuugo.

Qofka isticmaalay maandooriyaha sanka laga nuugo waa la daryeelayaa marka la tixraaco qaanuunka LVU ama LVM.

Miyaad dooneysaa in warbixin dheeraad ah aad ogaato?

Wax su'aalo ah miyaad haysaa?

Waxaad gashaa bogga Internetka ee cinwaankiisu yahay **www.ens2000.se** ama waxaad wacdaa lambarka telefoonka ee 019-20 57 00